Isku qiime ahaanta dadka oo dhan ee dugsiga xannaanada

– waa wax iska cad oo aan maalin walba ka shaqeyno!

Maxaad ka leedahay haddii baastada hawada sare qado laga dhigo? Ama xeelad sixir ah si riyooyinka carruurta caano dadka waaweyn looga dhigo? Ku soo dhawaw Barnens Planet (Caalamka Carruurta)!

Caalamka carruurta

Dugsigan xannaanada/Dugsigeenna xannaanadu waa mid ka mid dugsiyada xannaanada ee Swiidhan ee 2018 fursadda u helay in ay wax ka helaan walxaha Barnens Planet. Barnens Planet waa walxo ku aaddan xuquuqda, kala duwanaashada iyo in leys ixtiraamo. Waxay ka koobanyihiin buug sawirro ah, hagitaan iyo afar heesood oo si gaar ah loo qoray. Walxuhu waxay ka duulayaan manhajka waxbarashada ee dugsiga xannaanada iyo heshiiska QM ee xuquuqda carruurta (Barnkonventionen). Barnkonventionen wuxuu ka koobanyahay canug kasta xuquuqdiisa bani'aadannimada. Dhammaan xuquuqdu waxay khuseysaa canug walba haddii uu ahaan lahaa mid Swiidhan jooga iyo mid caalamka intiisa kale joogaba.

Hawsha dugsiga xannaanada

Dugsi kasta oo xannaano waxaa hawshiisa ka mid ah in uu si firfircoon oo ogaal ku jiro carruurta ugu gudbiyo qiimaha dimuqoraadiyadda. Ficil ahaan waxay ku saabsantahay in la gudbiyo waxa isku mid ahaanshada qiimaha dadka oo dhan ay dhab ahaan ka dhigantahay oo ay macnaheedu tahay, in laga shaqeeyo xuquuqda ay carruurtu u leedahay saameynta iyo in si kastaba looga shaqeeyo ka hor tagga takooridda.

Waa wax iska cad in uusan jireyn canug takoorid dugsiga xannaanada loogu geysanayo, iyadoo tusaale ahaan ay sababtu tahay medebkiisa, jinsigiisa ama qoyskiisa. Waana sidaas darteed sida ay

muhiim ugu tahay in dugsiga xannaanadu mar walba uu ka shaqeeyo arrimahan, su uu uga hortago takoorid, una xoojiyo jawi fiican in ay carruurta dhammaantood helaan. In loo hawl galo si ka hor tag iyo wax xoojin ah waxay qeyb muhiim ah ka tahay hawlaha dugsiga xannaanada, waana qeyb weyn oo manhajka waxbarashada ka mid ah. Barnens Planet waa fursad lagu xoojinayo shaqadaas.

Horbaba iskama cadda miyaa?

Dugsiga xannaanada waxaannu mar walba uga shaqeynaa in aan hawlaha wax qabadka horuumarinno, siina hagaajinno. Arrimaha sida saameynta, xuquuqda, dimuquraadiyadda iyo takoorid-la'aantu maaha wax abidkood noo dhamaanaya. Waa in ay qeyb muhiim ah waxa la qabanayo maalin walba ka ahaadaan, sanadka oo dhan. Waxaa taas lagu dhex sameynayaa xaaladaha maalinlaha ah, sida hoolka gudihiisa, ciyaaraha gudohooda iyo marka cuntada la cunayo, iyo mashruucyada iyo hawlaha firfircoonida ee gaarka ah gudohooda intaba. Waxaa manhajka waxbarashada ku qoran in dugsiga xannaanadu uu ku taaganyahay aasaaska dimuquraadiyadda - waan in maalin walba hawlaha wax qabadka laga arkaa!

Kala duwanaashada iyo isku qiimo ahaanshada

Buugga, gacan qabashada iyo heesaha ee ku jira Barnens Planet wuxuu ku saabsanyahay in aan dhamaanteen kala duwannahay isuna egnahay labadaba – mar walbana isku qiimo nahay. Kala duwanaashadu maaha wax xun ee waxay ka dhex jirtaa dadka oo dhan, xagga gudaha iyo xagga dibadda intaba. Dugsiga xannaanada hawshiisu waa in uu u hawl galo in carruurtu aysan kala duwanaashada dhexdooda ah iyo dadka kale u qiimeyn si ka fiican ama ka xun sida kale. Tusaale ahaan waxaa muhiim ah in aan la aamusin canug doonaya in uu farta ku fiiqo wax uu u aragyo kala duwanaasho, ee lagu qaabilo daneyn aad u weyn iyo wad hadal.

Waxyaabo xun-xun oo dadka kale laga aamino

Qof walba wey jiraan waxyaabo uu iska dhaadhiciyay, si kasta oo aan u jeclaan lahayn in aanan taas lahayn. Laakiin iyadoo wacaal loo lahaado waxyaabaha aan iska dhaadhicinnay, si firfircoonna loola dagaallamo waxaan isku dayi karnaa in aan hubinno in aysan saameyn sida aannu dadka kale u nahay. Waa wax ay tahay in aan dhamaanteen waqti walba ka shaqeyno – haddaan noqon lahayn carruur, barayaal iyo waaliddiinba! Dugsiga xannaanada waxaannu si firfircoon oo wacaal leh uga shaqeynaa in carruurtu aysan kala duwanaashada dhexdooda ah iyo dadka kale u qiimeyn si ka fiican ama ka xun sida kale.

In la xoojiyo kala duwanaashada iyo isu dul qaadku waa hawsha dugsiga xannaanada, si looga hor tago meel ka dhacyada iyo takooridda iyo in jawaab laga bixiyo meel ka dhacyada dhacay saas oo ay tahay. Waxay taasi ka dhigantahay in dugsiga xannaanadu uu muujinayo, ka sheekeynayo lana dagaallamayo nooc walba oo hadal ah oo cabbiraya waxyaabo xun-xun dadka kale laga aamino iyo isu dulqaadasho la'aan. Kuma filna in la fal celiyo oo keliya mar ay horbaba wax dhaceen - in wax la xoojiyo, lagana hortago ayaa la muhiimad ah.

Maxaad sameyn kartaa?

In si wada jir ah looga hadlo kala duwanaashada iyo isku qiimo ahaanshada waa wax iska cad sidoo kale oo ay qoysaska dhammaantood guriga ku sameyn karaan. Fadlan carruurtaada/canuggaaga wax ka weydii Barnens Planet! Waxaa hubaal ah in carruurtu ay hayaan fikrado iyo waxyaabo ay iska weydiinayaan kala duwanaashada iyo isku qiimo ahaanshada. Maskaxda ku hay in aadan u baahneyn in aad heysid jawaabaha oo dhan, ee waxaa ugu yaraan taas la qiimo ah in aad canugga wada hadal furan la yeelatid. Sidee la dareemayaa haddii aan leys dhegeysan? Ma jirtaa caddaalad darro uu canuggu arkay ama dareemay? Waa maxay sababta ay dhab ahaan aad muhiim ugu tahay in laga hadlo in dadka oo dhan ay isku qiimo yihiin?

Waxaad sidoo kale si wadajir ah heesaha Barnens Planet uga dhegeysan kartaan Spotify (raadi Barnens Planet waxaa markaas soo baxaya afartaas heesood).

Xasuusnaw!

Dugsiga xannaanadu maaha meel xagga anshaxa wanaagsan dhexdhexaad ka ah. Manhajka waxbarashada ayey ku caddahay hawsha dugsiga xannaanadu in ay tahay in si firfircoon oo wacaal leh looga shaqeeyo in carruurtu ay hormariyaan fahamka ay u leeyihiin anshaxa wanaagsan iyo baaxadda dimuquraadiyadda. Mar kasta oo ay bataan dadka qeybta ka ah shaqadaas muhiimka ah - waa marka ay sii fiicnaaneyso!

Macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan Barnens planet waxaad ka heleysaa: http://www.teskedsorden.se/for-skolan/forskola/



”Caalamka carruurta – carruurtu waxay ay yihiin ayey ku ahaan karaan!”

Dugsiga xannaanadu wuxuu ku taaganyahay aasaaska dimuquraadiyadda (...) Hawl muhiim ah oo uu leeyahay dugsiga xannaanadu waa in uu gudbiyo, dhidibbadana u aaso ixtiraamidda xuquuqda aadanaha iyo anshaxyada aasaasiga ah ee dimuquraadiyadda ee ay bulshada swiidhishku ku taagantahay. Manhajka waxbarashada ee dugsiga xannaanada 98/16, 1. Anshaxa wanaagsan iyo hawsha dugsiga xannaanada

Buugga waxaa lagu soo saaray taageero dhaqaale oo timid Arvsfonden iyo iskaashi dhex maray Teskedsorden, Gothia Fortbildning, Rädda Barnen iyo Svenska OMEP (Organisation Mondiale pour l’Éducation Préscolaire).